XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIYID / SENT
07 APR 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

**SHARCI LR. 24** **TAARIIKH: 31 MAARSO 2024**

**WAX-KA BEDDELKA CUTUBYADA 1AAD, 2AAD,3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobada 133aad, 134aad iyo 136aad (1) ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad (F) ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddonka Labada Aqal ee Baarlamaanka J.F.S ee summaddeedu tahay **BFS/B11/10/03/24**, ku taariikheysan **30/03/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Nuqulka Rasmiga ah ee Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad,2aad,3aad iyo 4aad ee Dastuurka. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qaraarka lambarkiisu yahay **GSH/31/16** ee ku taariikheysan **Agoosto 17, 2016** oo Baarlamaankii 9aad dib ugu dhigay dhameeystirka Dastuurka Baarlamaanka 10aad. |
| **MARKUU ARKAY:** | Xeer Madaxweyne ee ku taariikheysan 24/12/2020, kaasoo dib loogu dhigay dhameeystirka Dastuurka Baarlamaankii 11aad. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu meelmariyey Nuqulka Rasmiga ah ee Wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/050/2024
TAARIIKH: 8/4/2024
SAXIIX
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Tix:** *BFS/B11/03/24*
Kalfadhiga: *4aad*
Kulankiisa: *31aad ee Wadajirka Labada Aqal*

Taariikh: Maarso 30, 2024

**BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**Markuu Arkay:** Qodobbada 63(a) iyo 71(1)(a) ee Dastuurka KMG;

**Markuu Arkay:** Qodobbada 133aad, 134aad iyo 136(1) ee Dastuurka Ku-meel-gaar ah;

**Markuu Tixraacay:** Warqadda ku taariikhsan 15/7/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soo gudbin heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka" oo ay si wadajir ah ugu saxiixan yihiin Gudoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiyaha Aqalka Sare;

**Markuu Arkay:** Warqadda summadeedu tahay XWR/0277/06/2023 ee 18/6/2024, ujeedkeedunaha ahaa "Soo gudbin heshiisyada Golaha Wadatashiga Qaranka" oo ka soo baxday xafiiska R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu Tixraacay:** Warqadda summadeedu tahay GMDHD/GG/131/24 ee 8/2/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada laad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta al socota" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

**Markuu Arkay:** Warqadda tirsigeedu yahay GLD/BFS/02/2024 ee 10/2/2024 ujeedkeeduna yahay "Soo Gudbin Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka;

**Markuu Xaqiijiyey:** In ay soo idlaatay doodda mudanayaasha labada aqal ay fiirooyinkooda iyo talooyinkooda kaga dhibteen dhammaan cutubyada 1aad ilaa 4aad;

**Markuu Hubiyay:** In soojeedimaha loo soo gudbiyay laba aqal ee Baarlamaaka Federaalka Soomaaliya lagu soo dhafay soojeedimaha iyo talooyinka xafiisyada iyo hay'adaha ku xusan Qodobka 3(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG;

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Guddiga Dib u Eegista iyo La-socodka
Hirgelinta Dastuurka

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Constitution Review and Implementation Oversight Committee (OC)

**TR:26/LUULYO2023**

**Ku:** Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-U-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
**Og:** Guddoomiyaha Golaha Shacabka (BFS)
**Og:** Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare (BFS)

**Ujeeddo: Tilmaansiinta Diyaarinta Cutubka 1, 2, 3 iyo 4aad si waafaqsan Cutubka 15aad Qod. 133aad Far.5aad iyo 6aad ee Dastuurka KMG Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Guddiga Dib U Eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka;**

**Markuu arkay** Cutubka 15aad Qodobadiisa 133aad faqridiisa 5aad iyo 6aad, Qod. 134aad faqridiisa 7aad;

**Markuu arkay** warqadda Guddoonka labada Aqal ee BFS, kuna taariikheysaneyd 15ka Luulyo 2023 ee ay kusoo gudbiyeen heshiisyadii siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka; una kuur galay nuxurka heshiisyada lasoo gudbiyay;

**Markuu Guddigu ka dooday** hanaanka hishiisyada siyaasadeed loogu bedeli lahaa siiqo Dastuur, qaarna loo cadeyn lahaa in lagu qeexo shuruuc gaar ah;

**Markuu garwaaqsaday** in Guddiga Dib u Eegista iyo la-socodka Hirgelinta Dastuurka BFS uu awood u leeyahay inuu jaheeyo soo diyaarinta wax ka bedelka Dastuurka iyadoo la raacayo tilmaamaha ku xusan Cutubka 15aad;

Wuxuu idiin soo gudbinayaa:

1. In aad dib u eegis kusoo sameysaan Cutubyada 1aad, 2aad,3aad iyo 4aad iyadoo lagu saleynayo heshiisyadii siyaasadeed ee Golaha wadatashiga Qaran soo gudbiyeen.
2. Kuna saleysaan dib u eegistiinna soo jeedimihii Barlamaanka 9aad iyo 10aad iyo warbixinnadii la socday.

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka-bfs.so | website: www.dastuurka-bfs.so

Guddiga Dib u Eegista iyo la-socodka Hirgelinta Dastuurka wuxuu si kooban u tilmaamayaa arimaha soo socda:

1. In guud ahaan **Cutubka 1aad** in lagu sameeyo dib u eegis farsamo oo ay ku jirto eray bixin, toosin iyo habeyn.
2. In **Qodobka 8aad** laga sameeyo daraasad, lagana soo diyaariyo mabaa'di guud si looga soo saaro sharci gaar ah.
3. In **Qodobka 9aad** laga soo diyaariyo xulashooyin (options) la horgeyn karo BFS
4. In **Cutubka 2aad** lagu sameeyo dib u eegis farsamo iyo mid nuxur iyadoo fiiro gaar ah la siinayo **Qodobada 13aad, 15aad iyo 29aad**.
5. In **Cutubka 3aad** laga soo diyaariyo mabaa'di guud oo ku saabsan lahaanshaha, maamulka iyo wadaaga dakhliga khayraadka dabiiciga ah si waafaqsan Heshiiska Madasha Wadatashiga Qaran ku gaareen Magaaalada Baydhabo 27dii April 2018, waxaa sidoo kale muhiim ah in daraasad iyo mabaa'di guud laga soo diyaariyo ilaalinta dhulka iyo deegaanka maadaama ay yihiin aas aaska nolosha iyo xuquuqda aadanaha.

6. In **Cutubka 4aad** loo soo diyaariyo si waafaqsan heshiiska doorashooyinka ee Madasha Wadatashiga Qaran kaasoo tilmaamaya muddo xileedka Dowladdaha heer Federaal iyo heer Goboleed, doorasho qof iyo cod ah oo ku saleysan laba xisbi siysaasadeed, hal deegaan doorasho iyo matalaad isku dheeli-tiran (single constituency, proportion representation, with closed list), maamulkeedana uu leeyahay Guddiga Madaxa banaan ee Doorashooyinka iyo Xudduudaha.

   Inta lagu jiro wax ka bedelka Cutubka 4aad, waxaa lagama maarmaan ah in fiiro gaar ah loo yeesho **Cutubka 10aad** Qodobadiisa kala ah **111E iyo 111G,** sidoo kalana lala akhrinayo sharciga lagu dhisay Guddiyada Madaxbanaan ee Doorashooyinka iyo Guddiga Xudduudaha Iyo Federaalka, Sharciga Doorashooyinka iyo Sharciga Axsaabta

Ugu danbeyn, waxaa si xushmad leh looga codsanayaa Guddiga Madaxa banaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dstuurka in ay soo diyaariyaan wax ka bedelka cutubyada kor ku xusan sida ugu dhakhsiyaha badan iyadoo la tixgalinayo dib u dhaca ku yimid Dib u eegista Dastuurka iyo caqabadaha jira guud ahaan.

Mahadsanidiin

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDDIGA DIB U EEGIDDA IYO LA SOCODKA HIRGALINTA DASTUURKA

**Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf**
**Gudoomiyaha Guddiga Dib u Eegista la-socodka**
**iyo Hirgalinta Dastuurka**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/0277/06/2023** **Tariikh: 18/06/2023**

**Ku: Gudoonka Golaha Shacabka**
**Og: Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka XJFS**
**Og: Guddiga dib u eegista Dastuurka Qaranka (ICRIC)**
**Og: Gudoonka Golaha Aqalka Sare**
**Og: Madaxwaynaha JFS**

XRW - BIXIT
18 JUN 2023
OPM - EXIT

**Ujeeddo: <u>Soo gudbinta heshiisyada Golaha Wada tashiga Qaranka</u>**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qodobka 99aad xarfaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG. |
| Markuu arkay: | Qodobka 100aad xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG. |
| Markuu arkay: | War murtiyeedyada iyo Heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka ay gaareen lixdii kalfadhi ee qabsoontay Octoobar 2022 – Maajo 2023 |
| Markuu arkay: | Baahida waye ee loo qabo dardargalinta dhamaystirka Dastuurka Ku meel gaarka ah ee JFS. |
| Markuu arkay: | Mas'uuliyadda Dowladda ka saaran hir-gelinta heshiisyada Golaha Wada tashiga Qaranka ee ah in heshiiska loo gudbiyo Laanta sharci dajinta Dalka |

Wuxuu go'aamiyay qodbadan soo socda;

**Qodobka 1aad**

In aan guddoonka Golaha Shacabka JFS, aan si rasmi ah ugu soo wareejinno nuqullada saxda ah ee heshiisyadii ay gaareen Golaha Wada tashiga Qaranka (GWQ), Heshiisyadaas oo lagu gorfeeyay lix kal fadhi oo ku qabsoontay muddo hal sano ku dhaw ayaa lagu lafa guray, loogana heshiiyay qodobadan soo socda;

1. Hannaanka Doorashooyinka Dalka
2. Hannaanka Federaalaynta Awoodaha laamaha Dowladda
3. Hannaanka Garsoorka iyo cadaaladda Dalka
4. Qaab dhismeedka Hay'adaha Amniga
5. Iyo Hannaanka Federaalaynta Maaliyadda Dalka

Waxaa Guddoonka xasuusinayaa in ay Dowladda Soomaaliya horay heshiis uga gaartay Arrimaha Wadaaga Khayraadka Dalka, hadaba maadaama ay qodobadani ahaayeen kuwa ugu waawayn ee Dastuurku u xannibnaa, waxaan rajaynaynaa in Guddoonka iyo Golayaasha Baarlamaanku ay ka gudan doonaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

Wabillahi towfiiq

**Mudane Xamsa Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Tusmo:**

**Cutubka Koowaad: Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ........................................ 1**

Qodobka 1aad: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ........................................ 1

Qodobka 2aad: Diinta ........................................ 1

Qodobka 3aad: Mabaadii'da Aasaasiga ah ........................................ 1

Qodobka 4aad: Sarreynta Dastuurka ........................................ 2

Qodobka 5aad: Afafka Rasmiga ah ........................................ 2

Qodobka 6aad: Calanka iyo Astaanta Qaranka ........................................ 3

Qodobka 7aad: Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ........................................ 3

Qodobka 8aad: Shacabka iyo Jinsiyadda ........................................ 4

Qodobka 9aad: Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ........................................ 4

**Cutubka Labaad: Xuquuqda Asaasiga Ah iyo Waajibaadka Muwaaddinka ........................................ 5**

**Madaxa Koowaad: Mabaadii'da Guud ee Xuquuqda Aadanaha ........................................ 5**

Qodobka 10aad: Karaamada Aadanaha ........................................ 5

Qodobka 11aad: Sinnaanta ........................................ 5

Qodobka 12aad: Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah ........................................ 5

**Madaxa Labaad: Xuquuqda, Xorriyaadka Aasaasiga Ah Ee Qofka Iyo Xaddidaadooda .......... 6**

Qodobka 13aad: Xaqa Nolosha ........................................ 6

Qodobka 14aad: Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada ........................................ 6

Qodobka 15aad: Xorriyadda Ka-mid-noqoshada ........................................ 6

Qodobka 16aad: Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada ........................................ 7

Qodobka 17aad: Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta ........................................ 7

Qodobka 18aad: Xurmada Hoyga ........................................ 7

Qodobka 19aad: Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka ........................................ 7

Qodobka 20aad: Xorriyadda Isusocodka iyo Degitaanka ........................................ 7

Qodobka 21aad: Xaqa Ka Qaybgalka Siyaasadda ........................................ 8

Qodobka 22aad: Xorriyadda Xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda ........................................ 8

Qodobka 23aad: Xiriirka Shaqada ........................................ 8

Qodobka 24aad: Deegaan Nadiif ah ........................................ 8

Qodobka 25aad: Hantida Gaarka Loo Leeyahay ........................................ 9

Qodobka 26aad: Xuquuqda Bulshada ........................................ 9

Qodobka 27aad: Daryeelka Qoyska ........................................ 9

Qodobka 28aad: Xuquuqda Carruurta ........................................ 10

Qodobka 29aad: Waxbarashada ........................................ 10

Qodobka 30aad: Dhaqanka iyo Afka ........................................ 11

Qodobka 31aad: Xaqa Helidda Xogta ........................................ 12

